

503.01 DA'DA GELITAANKA EE ARDAYDA

Ujeeddo

Si loogu ogolaado inuu galo xannaanada carruurta, cunugu waa in uu ugu yaraan (5) sano jir yahay bisha sebteember 1deeda. Gelitaanka fasalka koowaadna, cunugu waa in uu ugu yaraan (6) sano jir yahay bisha sebteember 1deeda. Hase yeeshee, waxyaalahan soo socda si khaas ay ayaa loo tixgelineyaa:

Qeexidda Ujeedada

1. Iyadoo la tixgelineyaa codsi ka yimaada waalidka ama mas'uulka cunuga, waxaa dhici karta in qiimeyn gaar ah oo lagu go'aansanayo u diyaar ahaanta cunuga ku daritaanka barnaamijyada iskuulka ee caadiga ah, la siiyo carruurta ay shan jirsigoodu ama lix jirsigoodu ku beeganto inta u dhaxaysa Sebteember 1deeda iyo Diseember 31deeda, kulli, inkastoo aysan kasoo bixin shuruudaha da'da ee kor lagu soo sheegay. Cilmi-nafsi-yaqaan u shaqeeya Waaxda Waxbarashada ee Degmada St. Paul ayaa qaadaya qiimayntan, kadibna go'aankiisa/keeda ayaa kama dambays noqonaya.
2. Cunug aan ahayn shan sano jir ama lix sano jir marka la gaaro Sebteembar 1deeda, kaasoo usoo guura Saint Paul ayaa loo ogolaan karaa inuu galo xannaanada carruurta ama fasalka koowaad haddii uu si joogto ah u aadi jiray xannaanada carruurta ama fasalka koowaad ee iskuul kale oo la aqoonsan yahay. Diiwaanka iskuulka ama caddaynta iskuul aaditaanka cunuga waa in loo gudbiyaa maamulaha (diritoorka) dugsiga.
3. Cunug waa loo ogolaan karaa in la geeyo fasalada waxbarashada khaaska ah ee loogu tala galay dadka jir ahaan ama maskax ahaanba dhiman marka ay ansixiyaan qaybta waxbarashada khaaska ah, inkastoo ay dhici karto in cunugaani uusan shan sano jir noqon doonin ilaa Sebteember 1deeda ka dib.
4. Cunug waa loo ogolaan karaa inuu galo barnaamijka xannaanada carruurta taasoo:
 - a) Isticmaasha habka tusaalaynta iyo waxbaridda ee Montessori ama hab kale oo kaga duwan naqshad ahaan, ahmiyad-saarid ahaan, iyo hab ama farsamo waxbaritaanba barnaamijka caadiga ah ee xannaanada carruurta.
 - b) Ay guddiga iskuulku ugu tala galeen barnaamij loo yaqaan magnet, kaasoo daba socda qorshe loo dejiyey inuu hagaajiyo farqiga u dhexeeya dadka kala jinsiga duwan ee iskuulada Degamada, ama
 - c) Loo qaabeeyey barnaamij hore oo xannaanada carruurta ah oo loogu tala galay carruurta ugu yaraan (3) sano jir noqon doonta Sebteembar 1deeda ee sannad dugsiiyeedkaas.

TIXRAACYO CELIN:

TIXRAACYO SHARCI: Xeerka Minnesota ee 120.06